



PUBLIC SCHOOLS

Soo Bandhigidda Dashboard COVID-19 La Cusboonaysiiyey oo Si Fudud Loo Akhriyi Karo

Bulshada PPS ee Sharaftha Leh,

Waad ku mahadsan tiihiin ra'yi celintiina, waxa aanu sii wadnaa inaanu horumarin ku samayno Dashboard kayaga COVID-19, annaga oo u sii fudaydinayna qoysaska PPS inay arkaan warbixinadii ugu dambeeyey ee ardayda iyo shaqaalaha kuwaas oo laga dalbaday inay galaan go'doon ama karantiil.

Dashboard ka waxa la cusboonaysiiyaa afar jeer maalintii waxana laga heli karaa pps.net/covid19dashboard.

Goob Kasta oo PPS Imika Waa La Soo Bandhigay

Dashboard ka la horumariyey imika waxa uu soo bandhigaa goob kasta oo PPS, xattaa haddii goobtaasi aanay lahayn wax dhacdo go'doomin ama karantiil ah oo la soo sheegay intii lagu gudo jiray muddadii wakhtiga ahayd ee la doortay. Tani waxa ay run ku tahay jadwalka xogta (ee ku yaalla dhinaca bidix ee dashboard ka) iyo liiska doorashada dhismaha labadaba. Taas waxa dheer, goob kasta oo ku jirta jadwalka xogtu sidoo kale waxay muujisaa laymanka jiif u taxa ah oo loogu talagalay go'doominta, karantiilkha (u baylihitaanka xanuunka ee meel ka baxsan goobta), iyo karantiilkha (u baylihitaanka xanuunka ee goobta) xattaa marka aanay jirin wax qiimayaal ah qaybtan dhacdada ah inta lagu gudo jiro xaddiga taariikhda la doortay.

Xog Ma Jirto = 0

Wakhtigii hore, marka aanay wax qiimayaal ah lahayn nooc dhacdo oo gaar ahi tan waxa lagu soo bandhigi jirey lambarro waaweyn oo ku yaalla halka sare ee midig oo ay la socoto qoraal ah “Xog Ma Jirto.” Tani waxa ay ahayd mid khalkhal keenaysay maadaama oo ay u muuqatay inay tilmaamayso in macluumaadkan aan la ururin, arrinkuna sidaas ma ahayn. Iyada oo taas laga falcelinayo, qaybtu waxa ay imika muujin doontaa eber haddii uu macneheedu yahay kiis ma jiro.

Jaatuska Aagga: Wadarta Shakhsiyaadka Bilaabaya Go'doonta/Karantiilkä inta Lagu Gudo Jiro Maalintii

Isbeddelka ugu weyn ee dashboard ku waa meelaynta jaantuska aagga (midgta fog, ku xiga jaantuska heerka tallaalka shaqaalaha) taas oo muujinaysay tirada shakhsiyadka ee galayey karantiil ama go'doomin midkood wakhti kasta oo lagu siiyo. Khalkhal badan baa ka jiray waxa jaantuskan macnihiisu yahay, iyo sababta qiimayaashiisu aanay u waafaqsaneyn tirooyinka waaweyn ee toos uga sarreya. Jaantuska cusubi waxa uu muujiyaa shakhsiyadka bilaabaya inay galaan go'doon ama karantiil, isla qiimayaasha ayaa lagu muujinayaa qaybta sare ee midig. Fadlan ogsoonow haddana in qaybta sare ee midig ay weli muujinayso wadarta xaddiga taariikhda la doortay halka jaantusku uu muujinayo wadar maalinle ah oo ah maalin kasta oo ku jirta isla xaddigaa taariikhda.

Wadarta Heerka Falcelinta Tallaalka Shaqaalaha

Hal cusboonaysiin oo u dambaysa ayaa ah ku darista ogaysiis (halka hoose ee midig) taas oo muujinaysa % da shaqaalaha kuwaas oo ku wargeliyey PPS xaaladdooda tallaalka.

Waad ku mahadsan tiihiin mar labaad samirkiina intii aanu wadnay cusboonaysiinta macluumaadkayaga si aanu si wanaagsan ugu wargelino bulshadayada.

Jonathan Garcia
Madaxa Shaqaalaha